



MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

# Lamotrigin Actavis

Dawaynta qalalka



## Xog muhiim ah!

Haddii aad ka dhibmayso finan maqaarka, xumad, barar wajiga ah ama hargab sida calaamadahaas marka aad bilowdo daawaynta Lamotrigin Actavis, waa muhiim in aad la xidhiidho dhakhtarkaaga isla markaaba, maxaayeelay calaamadahaas waa xaalado dhif ah, waxay noqon karaan tilmaamayaasha saamayta dawada oo aan fiicnayn. Wixii xog dheeraada ah, eeg xogta bukaan jiiifka warqada macluumaadka ee ku dhex jirta xidhmada.

## Sida loo isticmaalo Lamotrigin Actavis

Had iyo jeer qaado u qaado Lamotrigin Actavis sida uu dhakhtarkaagu ku faro Haddii aanad hubin, waa in aad raadisaa tallada dhakhtarkaaga ama shaqaalaha farmasiigaaga Daawayntu caadi ahaan waxay ku bilaabantaa dawo qaadasho hoosaysa taas oo ka dib loo kordhiyo si aayar aayar ah.

Waxay qaadan kartaa wakhti in la helo dawo qaadasahda kugu habboon. kiniinka waa in la wada qaataa dhammaantii isku wakhti(yo) maalinta ah. Lamotrigin Actavis waxaa la qaadan karaa cunto ama cunto la'aan. Haddii aad qaadanayso kiniika biyaha lagu rido (milma), waxaad ku liqi kartaa dhammaantood biyo yar, calaasho iyaga ama biyo ku dhex mil iyaga.

Haddii jeer qaado dawo qaadasho buuxda sida uu kuu oqro dhakhtarkaagu. Weligaa ha qaadan qayb ka mid ah kiniinka



## Intee in leeg ayay daawayntu socon doonta?

Dhakhtarkaagu waxa uu si wada jir ah adiga kuula go'aamiyaa ilaa inta daawayntaadu socon doonto. Waa muhiim in aanad joojin daawayntaada adigoo la xidhiidhin dhakhtarka Joojin kedis ah oo dawada Lamotrigin Actavis waxay keeni kartaa halista koradhka tirada qalalka ama suuxdinta. Haddii, sabab kastaba, daawayntaadu joogsatay, qadarka dawo qaadashada waa in loo yareeyaa si aayar aayar ah sida lagu sheegay dawo qorista aad ka hesho dhakhtarkaaga.


## Maxaan yeelayaa haddii aan qaaday Lamotrigin Actavis aad u tiro badan?

Haddii aad qaadatay Lamotrigin Actavis aad u badan, ama

haddii uu ilmo yar u qaatay dawadan khalad ahaan, waa in aad isla markaaba, la xidhiidhaa dhakhtarka, shaqaalaha cusbitaalka, shaqaalaha farmasiiga ama Xarunta Macluumaadka Sunta (garaac 112) wixii qiimayn khatarta ah iyo waano.

## Maxaan samayn doonaa haddii aan ilaabo in aan qaato dawadayda?

Ha qaadan kiniin dheeraad ah si aad ugu soo magdhowdo dawo qaadashadii la ilaabay. Haddii aad ilowday in aad qaadao dawadaada, waydii dhakhtarkaaha sida aad dib ugu bilaabayso. Tani aad bay muhiim u tahay haddii muddo wakhti ah ay dhaaftay laga bilaabo dawa qaadasahdaadii u damabaysay.



MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

# Lamotrigin Actavis

Dawaynta qalalka

## Waa maxay saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada ee aadka loo yaqaanaa?

Sida dawooyinka kale Lamotrigin Actavis waxay keeni kartaa saamayn dawo oo aan fiicnayn, aakiin kuma aha dhammaan dadka qaadanaya in ay dhammaan dhibi ka soo gaadhayso. Saamaynta aan wanaagsanayn ee dawadu “ waxaa aad looga yaqaanaa” oo waxay ku dhacaan in ka badan 1 ruux 10 kii bukaan jiif ay ka mid tahay finanka maqaarka, madax xanuun, dawakhaad. hurdo la'aan ama lulo, la'aanta aragti aan isku xidhnayn ama mid haydh leh. Saamaynta dawlada waxaa la isaga ilaalin karaa iyaddoo si aayar ah loo kordhinayo daawaynta.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saamaynta dawada ee aan wanaagsanayn waxaa laga heli karaa warqadda macluumaadka ee ku jirta xidhmada.

## Maqaadan karaa dawooyin kale?

Saamaynta Lamotrigin Actavis way is beddeli kartaa oo waxaa jira halis kordhaysa oo saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada ah haddii aad qaadato dawooyin kale oo gaar ah isku wakhti. Qoraal kuwan aha waxaa laga heli karaa warqadda macluumaadka ee gudaha xidhamada.



Had iyo jeer u sheeg dhakhtarka haddii aad qaadanayso ama aad dhawaan qaadatay dawooyin kale. Kuwan waxaa ku jira dawooyinka iyaddoon la qorin la iibsado iyo daawayntaha dabiiciga.

## Gaadhi ma kaxayn karaa?

Lamotrigin Actavis waxay sababi kaeraa dawakhaad iyo araga oo labba noqda. Sidaas awgeed, gaadhi ha kaxayn ama ha ku shaqayn mashiin haddii aanad dareemayn caafimaad. Waxaad masuul katahay go'aansashada hadduu aad ku jirto xaalad aan ku wado gaadhi ama aad samaynayso shaqo u baahan adigu in aad aad u digtoonaato. Si kastaba ha ahaatee, xusuuso marka aad suuxdinta leedahay, laguuma ogola in aad gaadhi kaxayso marka aad soo dhaaftay hal sano oo bbuuxa oo aan suuxdin lahayn.

## Ma cabbi karaa khamro?

Waxaa jira xayiraado gaar ah oo khuseeya qaadashada khamrada oo dhaafsiisan talada guud in laga digtoonaado qaadasho khamro oo xad dhaaf ah, gaar ahaan haddii aad suuxdin leedahay.

## Uurka iyo naasnuujinta

Ilmaha uurka kujira waxaa dhici karta in ay saamayso daawayntaada Lamotrigin Actavis. Sidaas awgeed, had iyo jeer waydiiso talo haddii aad uur leedahay ama aad qorshaynayso in aad uur yeelato marka aad helayso daawaynta. Haddii aad uuraysato, ha joojin daawaynta ugu horayn adigoo raadin talada dhakhtarkaaga.

Heerka Lamotrigin Actavis ee dhiiga ku jira waxa uu is beddeli karaa mudda uurka., Dhakhtarkaagu sidaas awgeed waxa uu u baahanyahay in uu qaatobaadhitaan dhiig oo caadi ah si uu u hubiyo heerarkaaga Lamotrigin Actavis sidaas darteed dawa qaadashadaada waa la beddeli karaa haddii ay lama huraan tahay.

Lamotrigin Actavis. waxa ay soo raacdaa caanaha naaska laakiin haweenka badankoodu waxay siiw adan karaan naasnuujinta ilmahooda. Kala hadal halisaha iyo faa'iidooyinka naasnuujinta dhakhtarkaaga.



.....

.....

.....

.....

